Way fiican tahay in la ogaado in taageero dheeraad ah la heli karo

Macluumaad muhiim ah

Xaaladaha degdega ah ee korontada

Farsama yaqaanka shabakada korontadaada ayaa ilaalinaya korontadaada. Haddii gurigaaga ay ka jirto xaalad degdeg ah oo koronto la'aan ah waxaad u baahan doontaa inaad wacdo. Si aad ula xiriirto, ka wac EDF **0333 200 5100** waxaan ku siin doonnaa lambarka hawlwadeenka shabakada ee xaafadaada. Haddii kale, waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xiriirka **edfenergy.com** qeybta hoos timaada 'Emergency information' (Macluumaadka xaalad degdeg ah)..

Adeegyada Macmiilka

Wixii su'aalo guud ah, wac **0333 200 5100**.

Gaaska daadanaya ama xaaladaha degdega ah

Haddii aad dareento ur gaas ama aad ka welwelsan tahay arrin badbaado dhanka gaaska ah, fadlan ka wac National Grid Gas lambarkan **0800 111 999**. Waxaa jira adeeg minicom ah oo laga heli karo **0800 371 787** iyo telefoon qoraal ah oo loogu talagalay macaamiisha qaba dhibaatooyinka maqalka oo laga heli karo **0800 096 2929**.

Adeeg Taageero Shakhsi Ahaaneed

Adeegga Taageerada Shakhsiyeed ee EDF wuxuu isu keenaa adeegyo kala duwan si ay u caawiyaan macaamiisha ugu baahida badan. Booqo **edfenergy.com/pss** si aad u aragto sida ay kuu caawin karaan.

khadka caawinta macaamiisha ee Citizens Advice

Kala xiriir adeegga macaamiisha ee Citizens Advice lambarkan **03454 04 05 06**.

R886.01.20.v5

EDF Energy waa magac ganacsi oo ay isticmaasho EDF Energy Customers Ltd, Lambarka Diiwaangalinta 02228297 oo Xafiiskiisu ku yaal 90 Whitfield Street, London, W1T 4EZ, oo ku shirkoobay England iyo Wales.



Caawimaad dheeri ah markaad u baahan tahay

Hagahaaga taageerada haddii aadan haysan gaas ama koronto

EDF

Badbaadadaada ayaa mudnaan noo leh

Sidaad ogtahay, farsamo yaqaan ayaa soo booqday gurigaaga dhawaan isagoo ka wakiil ah EDF. Si kastaba ha ahaatee, intii ay halkaas joogeen waxay ku qasbanaadeen inay jaraan gaaska iyo/ama korontadaada iyadoo ay sabab utahay arrin badbaado oo ay arkeen intii ay halkaan joogeen.


Farsamo yaqaankaaga ayaa sharxi doona arrinta iyo tallaabooyinka loo baahan doono in la qaado si arrintan loo saxo. Waxay sidoo kale la xiriiri doonaan hawlwadeenkaaga shabakadda korontada iyo/ama National Gas Grid haddii ay tani daruuri tahay.

Si aad u daryeesho qaar ka mid ah baahiyaha aasaasiga ah, waxaan ku siinaynaa qaar ka mid ah qalab muhiim ah oo laga yaabo inay kaa caawiyaan inaad hesho – kuleyliyaha marawaxada korantada, kuukarka iyo faynuuska dalxiiska teendhada.

Qasab naguma aha inaan ku siino kuwan shirkadaha kalena sidoo kale waxaa laga yaabaa inaysan ku siinin. Laakiin waxaan u maleyneynaa in macaamiisha lagu caawiyo xaaladaha adag ay tahay waxa saxda ah ee la sameeyo. Wax lacag ah lagama bixinayo waxyaabahan daruuriga ah adigaa iska leh – xitaa marka wax walba la hagaajiyo oo si buuxda u shaqeynayaan.

Dhanka kale waxaad heli doontaa tafaasiil ku saabsan waxa la soo bandhigay dhabarka buug-yarahaanna waxaa ku yaal lambaro taleefan oo muhiim ah iyo linkiyada adeegyo waxtar leh.

Maxaa ku jira xirmadaada waxyaabaha daruuriga ah



Kuleyliyaha marawaxada ee korontada ku shaqeeya (oo lagu talaalayo korontada)

Xataa bilaha xagaaga waxa ay dareemi kartaa qabow xilliga habeenkii. Isticmaal kuleyliyaha marawaxada korontada ku shaqeeya si ay kaaga caawiso in aad diirimaad hesho marka uu qabow jiro. Si aad ugu ogolaato in kulaylku si hufan ugu faafo qolka, waxba ha ku daadin marawaxada.don't drape anything over the fan.



Kuukarka halka wareeg leh ee korontada ku shaqeeya (oo lagu talaalayo korontada)

Xataa halka wareeg keliya waxaad ku karin kartaa cunto wanaagsan. Xusuusnow inaad hubiso inaad damiso markaad dhammaysato karinta si aad uga fogaato khatar kasta oo dhanka dabka ah.



Faynuusta dalxiiska teendhada (batari ku shaqaynaya)

Shumac ka shidan gudaha marka ay mugdi tahay waxay wadataa khatar dhanka dabka ah. Si aad uga fogaato inaad tan samayso waxaan ku siinaynaa faynuus markaad iftiinka u baahato.